



## Benson oo qorsheeyay in uu barnaamijyadiisa badan ku soo bandhigo Bandhiga Farsamada ee sanadlaha ee 99<sup>aad</sup>

Ma rabtaa in aad aragto robot-yada oo shaqeynaya? Ku ciyaar miisaska qulqulaya ‘stream tables’ isla markaana isku day tijaabooyinka kiimikada? Gado shaqooyinka ardayda farshaniistayaasha ah ee hibadda leh? Fiirso bandhiga mashaariicda guriga yar iyo tiknoolajiyada guryaha casriga ah? Fiiri warbaahinta suxufinimada ee tooska loo baahinayo? Arag bir la dhalaaliyay/dareere ah oo ah meel lagu shubayo?

Ma kuu haynaa dhacdo adiga laguugu talagalay. Bandhiga Farsamada ee Benson waxaa markii 99-naad la qaban doonaa Khamiista iyo Jimcaha, Maarsuo 14-15. Dhacdada lacag la'aanta ah waxay soconysaa laga bilaabo 6 ilaa 9 habeenimo, labada habeenba.

Dhacdadu waa bandhig loogu talagalay barnaamijo badan oo laga bixiyo Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson, oo sidoo kale loo yaqaano waxbarashada heerka sare ee afarta sano ah ee Oregon oo diiradda la saaro dugsiga sare. Benson "wuxuu bixiyaa tacliin adag iyo tababar dhab ah oo gacanta laga qabanayo oo ardayda u diyaarisa kulliyad iyo xirfad sare, shaqo qarniga 21-aad la socota oo lacag badan la qaadanayo."

Benson, oo ku taala [546 NE 12th Ave.](#), waxa albaabadeeda u furi doontaa dadweynaha, iyaga oo dadka soo booqdaa ay ku wareegi karaan hoolasha isla markaana qaadan karaan 32 bandhig oo ah fasallada iyo qolal kale. Marka lagu daro bandhigyada kor ku qoran, waxaa sidoo kale jiri doona:

- Soo bandhigista naqshadaha la kala dooranayo oo loogu talagalay dhismaha Benson, oo la qorsheeyay in uu maro [olole qeyn oo dhanka casriyeynta ah](#) oo bilaabmaya sanada 2021. Qiyaasta nooca goobta jimcsiga oo faahfaahsan iyo dhismaha oo buuxa ayaa la soo bandhigi doonaa.
- Soo bandhigista dhisme ku qalabeysan mishiino, mishiino loogu talagalay isticmaalka shaqada alwaaxda/birta ‘lathes’, giriiga/jeega ku shaqeeya cadaadiska ‘hydraulic jacks’ iyo qalabka kale ee warshadaha.
- Istuuudiyoo sawir toos ah lagu qaadayo, halkaasi oo dadka soo booqdaa laga qaadi karo sawir.
- Saddex bandhig oo kala duwan oo dhanka caafimaadka ah, oo ay ku jiraan casharka CPR, baaritaanka sonkorowga, qalliinka fudud iyo soo bandhigista tolliinka ‘suture, iyo istusida farsamooyinka saxda ah ee rumayashada/cadayashada iyo findhicilashada.
- Gadista buug-sanadeedyada dugsiga ee Benson ee sanadihii hore, oo ka socda 1970 ilaa 2012, oo intooda badan cusayb ku dhow yihiin.

Liiska buuxda ee bandhigyada, fiiri [website-ka dhacdada](#).

